



Seattle
Parks & Recreation

SHAACINTA WAR

Bruce Harrell, Duqa Magaalada
AP Diaz, Kormeeraha Guud

Si dhakhso ah Loo Shaaciyo:

Ogosto 21, 2025

Xiriirka: Karen O'Connor, 206-233-7929
karen.o'connor@seattle.gov

Qaabee Lake City Community Center Dib u eeg Naqshada oo Bixi Jawaab celin Sahanku wuu Xirmayaa 1 Sebteembar!

Waadta Beeraha iyo Madadaalada Seattle (Seattle Parks and Recreation, SPR) waxay ku dhiirrigelinaysaa dhammaan bulshada Lake City inay ka qaybqaataan horumarinta Xarunta Bulshada Lake City Community Center. **Fadlan ka qaybqaado [sahankan gaaban](#)** oo nagu soo booqo booskayaga Khamiista, 28 Agoosto intii lagu jiray Suuqa Beeralayda Lake City ee ka dhacaya Albert Davis Park, 12526 27th Ave NE, laga bilaabo 3 galabnimo ilaa 7 fiidnimo.

Sahankani waa fursad bulshada loogu oggolaanayo inay wax badan ka ogaato mashruuca oo ay bixiyaan jawaab celin ku saabsan ikhtiyaarrada naqshadeynta xarunta bulshada. Sahanku waxa uu ku jiraa luqado kala duwan (Amharic, Oromo, Russian, Somali, Spanish, Tigrinya, Traditional Chinese, Ukrainian, Vietnamese) bogga internetka waxaana uu xirmi doonaa dhammaadka maalinta, Isniinta, 1 Sebteembar 2025. Waad mahadsan tahay qof kasta oo ka qaybqaatay ilaa maanta.

Waadta Seattle ee Parks and Recreation iyo the Seattle Office of Housing (OH) waxay ku faraxsan yihiin inay helaan [Mercy Housing oo ah hormuudka dib-u-habaynta mashruuca](#) Lake City Community Center. Horumarinta Lake City Community Center waxay soo bandhigaysaa fursad gaar ah oo lagu mideynayo xarun cusub oo bulsho iyo 113 guri kirayso jaban ah, dhammaan ku yaalla meel hal goob ah oo ku dhow Lake City Branch Library iyo Albert Davis Park. Tani waa iskaashigii horumarineed ee ugu horreeyay ee u dhexeeya Xafiiska Guryeynta (Office of Housing, OH) iyo SPR, taasoo u suurta gelinaysa Magaalada inay isku darto kheyraadka si loo abuuro guryo la awoodi karo oo si weyn loogu baahan yahay, oo laga dhisayo dusha xarun bulsho oo cusub. SPR waxay sii wadi doontaa inay lahaato oo ay hawlaliso Lake City Community Center, 12531 28th Avenue NE., marka dib loo dhiso. Xaruntu waxay sii ahaan doontaa qayb muhiim ah oo ka tirsan xaafadda Lake City, iyadoo u adeegaysa sidii xarun loogu talagalay hawlaha bulshada una midaynaysa dadka da'da kala duwan leh, kartida kala duwan leh, iyo dhaqamada kala duwan.

Wixii macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan labada mashruuc fadlan booqo <https://www.seattle.gov/parks/about-us/projects/lake-city-community-center-redevelopment> ama kala xiriir David Graves barta David.graves@seattle.gov

Macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan Office of Housing fadlan booqo <https://www.seattle.gov/housing/programs-and-initiatives/lake-city-community-center-redevelopment#fqlakecitycommunitycenterredevelopment.xml>

###